


## Bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa waxay khatar weyn ku yihiin caafimaadkeena

Isticmaal kasta ee qalajiye/antibiyootika waxay keentaa iska caabbin dawo. Ayadoo la isticmaalo qalajiye/antibiyootika markii run loogu baahdo baan ku joojin karnaa bakteeriyada qalajiyaha iska caabisa ee soo kordhaysa.



Ma rabtaa inaad sii ogaatid wax intaa dheer?



[www.1177.se](http://www.1177.se)




[www.antibiotikaellerinte.se](http://www.antibiotikaellerinte.se)



[www.skyddaantibiotikan.se](http://www.skyddaantibiotikan.se)


Bakteeriyada ku jirta kaadida dadka waayeelka ah  
- Maxaa dadkoo dhan qalajiye (antibiyootika) loo siin waayay?



# Illaa iyo in garaysa kala waayeelka ah kaadidooda waxaa ku jirta bakteeriyoyadiyo iyadoo aan wax dhib ah sababin

Laakiin haddii gofku uu dareemo inuu jirran yahay oo caatiimaad darro xun aw dareemayo?


Waxaa muhiim ah in daryeelka caatiimaadka sameeyaan qiimayn dhamaystiran si aysan nooga hoos bixin waxa keenay xanuunka ama aynaan si khalad ah ugu turjuman inuu yahay caabuq/ektashin kaadimareenka ah.



Qalajiyey/antibiyootika ma iska qori kartaan miyaa, si loo hubsado?

Ka bukaan ahaan waxaa muhiim ah inaan la siin qalajiyey/antibiyootika ayadoo aan loo baahnayn. Qalajiyaha/antibiyootikada waxay keeni kartaa saamayn xun sida shuban oo kale.


Qalajiyaha/antibiyootikada waxay dishaa bakteeriyaya waxtar difaac ah inoo leh oo ku jirta kaadimareenka iyo mindhicirrada labadaba.



Waxaa teeda kale hails loo galayaa in lasii caawiyo bakteeriyada qalajiyaha/antibiyootikada iska caabisa. Bakteeriyadaas waxay ayguna markooda keeni karaan caabuqyo/ektashino ay adagtahay in la daaweeyo.

Laakiin haddii gofku uu dareemo daal, walwal ama wareersan yahay?

Ayaamihii hore waxaa loo arki jiray inuu keenay caabuq/ektashin kaadimareenka ah, laakiin maantay waxaan ognahay in dhibka badanaa ay waxyaalo kale sababaan.



Sidee baa lagu ogaan karaa inuu yahay caabuq (ektashin) kaadimareenka ah, markaas?

Markii xanuunku aw yahay mid kugu cusub, sida xanfaf markaad kaadinasid ama kaadida oo dhib kaaga soo baxda waxaa sababi kara caabuq/ektashin kaadimareenka ah oo markaas qalajiyaha/antibiyootika badanaa way caawisaa. Tijaabo kaadi baa la gaadaa markii aw jiro shaki cad oo ku saabsan inuu jiro caabuq/ektashin kaadimareenka ah.

